2026

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA MAALIYADDA

HINDISE-SHARCIYEEDKA SHARCIGA DHISMAHA HAY'ADDA DAKHLIGA QARANKA

TUSMO

QEYBTA 1AAD: QODOBBO GUUD 4

QODOBKA 1AAD: MAGACA IYO UJEEDDADA 4

QODOBKA 2AAD: EREY-BIXIN 4

QEYBTA 2AAD: DHISMAHA, AWOODAHA IYO SHAQADA 5

QODOBKA 3AAD: DHISMAHA HAY'ADDA 5

QODOBKA 4AAD: MADAXBANNAANIDA HAY'ADDA 5

QODOBKA 5AAD: KORJOOGTEYNTA WASIIRKA WASAARADDA 5

QODOBKA 6AAD: SHAQADA HAY'ADDA 6

QEYBTA 3AAD: GUDDIGA SARE 7

QODOBKA 7AAD: DHISMAHA IYO XUBNAHA GUDDIGA SARE 8

QODOBKA 8AAD: SHAQADA GUDDIGA 8

QODOBKA 9AAD: SHIRARKA GUDDIGA 8

QODOBKA 10AAD: GUDDI HOOSAADYADA GUDDIGA 9

QODOBKA 11AAD: LUMINTA XUBINNIMADA GUDDIGA 9

QEYBTA 4AAD: MAAMULKA HAY'ADDA IYO SHAQAALAHA 11

QODOBKA 12AAD: AGAASIMAHA GUUD 11

QODOBKA 13AAD: MAAREYNTA SHAQAALAHA IYO ILAALINTA HUFNAANTOODA 13

QODOBKA 14AAD: ILAALINTA WARGELIYAHA 14

QODOBKA 15AAD: MAGACAABISTA SHAQAALAHA IYO SARAAKIISHA 14

QEYBTA 5AAD: MAALIYADDA IYO XISAABAADKA 15

QODOBKA 16AAD: MAAMULKA DAKHLIGA IYO ISTICMAALKA KHASNADDA MIDEYSAN 15

QODOBKA 17AAD: DHAQAALAHA HAY'ADDA 16

QODOBKA 18AAD: DIYAARINTA SOO JEEDINTA MIISAANIYADDA HAY'ADDA 16

QODOBKA 19AAD: XISAABAADKA IYO HANTI-DHOWRKA 16

QODOBKA 20AAD: WARBIXIN XILLIYEEDKA 17

QEYBTA 6AAD: XOOJINTA DAKHLIGA IYO WADASHAQEYNTA 17

QODOBKA 21AAD: URUURINTA CANSHUURAHA DOWLADDA FEDERAALKA 17

QODOBKA 22AAD: URUURINTA CANSHUURAHA WADAAGGA AH 18

QODOBKA 23AAD: SHARCIYADA DAKHLIGA EE AY KU SHAEYSO HAY'ADDA 19

QODOBKA 24AAD: ABAALMARINTA 19

QEYBTA 7AAD: QODOBBO KALA DUWAN 20

QODOBKA 25AAD: XEER-NIDAAMIYEYAASHA 20

QODOBKA 26AAD: KALA-GUURKA 20

QODOBKA 27AAD: DHAQAN-GALKA SHARCIGA 20

QAYBTA 1AAD:

QODOBBO GUUD

Qodobka 1aad:
Magaca iyo Ujeeddada

1. Sharcigan waxaa loogu yeerayaa "Sharciga Dhismaha Hay'adda Dakhliga Qaranka".

2. Sharcigan waxaa lagu dhisayaa Hay'adda Dakhliga Qaranka (oo loogu yeeri doono "Hay'adda Dakhliga Qaranka", marka ay gudanayso waajibaadkeeda), taasoo ah hay'ad heer federaal ah oo shaqo iyo maamul ahaanba u madaxbannaan, kana mas'uul ah maamulka iyo uruurinta dakhliga Dawladda Federaalka si waafaqsan qodobka 169aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 2aad:
Eray-bixin

Haddii aan Sharcigan gudahiisa si kale loogu qeexin, ereyadan soo socda mid kasta wuxuu yeelanayaa macnaha ku hor qoran:

1. **"Hay'adda"** waxaa loola jeedaa Hay'adda Dakhliga Qaranka ee lagu dhisay sharcigan;

2. **"Guddiga"** waxaa loola jeedaa Guddiga Sare ee lagu dhisay Hay'adda Dakhliga Qaran;

3. **"Guddoomiyaha"** waxaa loola jeedaa Guddoomiyaha Guddiga Sare;

4. **"Hanti-dhowraha** Guud" waxaa loola jeedaa Hanti-dhowraha Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

5. **"Agaasimaha Guud"** waxaa loola jeedaa Agaasimaha Guud ee Hay'adda ee lagu magacaabay Qodobka 12-aad, kaas oo sidoo kale ah Xoghayaha Guddiga;

6. **"Xoghayaha"** waxaa loola jeedaa Agaasimaha Guud marka uu qabanayo shaqada Xoghayaha Guddiga;

7. **"Sanad-maaliyadeedka"** waxaa loola jeedaa muddada ka bilaabata 1-da Jannaayo kuna dhammaata 31-ka Diseembar sannad kasta, haddii aan sharci kale lagu go'aamin muddo ka duwan;
8. **"Wasiirka"** waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda ee Dawladda Federaalka Soomaaliya;

9. **"Xeer-ilaaliyaha Guud"** waxaa loola jeedaa Xeer-ilaaliyaha Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

10. **"Dakhli"** waxaa loola jeedaa cashuuraha, khidmadaha, ganaaxyada iyo lacagaha kale ee Dawladda Federaalka ee ay Hay'addu u xilsaaran tahay inay uruuriso, kuwaas oo lagu qeexay Qodobka 21-aad ee Sharcigan;

11. **"Dastuurka"** waxaa loola jeedaa Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee 2026.

QAYBTA 2^{AAD}:
DHISMAHA, AWOODAHA IYO SHAQADA HAY'ADDA

Qodobka 3^{aad}:
Dhismaha Hay'adda

1. Waxaa halkaan lagu dhisay Hay'adda Dakhliga Qaranka, taas oo ah hay'ad dawladeed oo shaqo iyo maamul ahaanba madaxbannaan, isla markaana leh astaan u gaar ah iyo shakhsiyad qaanuuneed.

2. Astaanta iyo shaabadda Hay'adda waxaa dejinaya Guddiga Sare ee Hay'adda, waxaana ilaalinaya Agaasimaha Guud.

3. Dukumeenti kasta oo ay soo saarto Hay'adda oo leh shaabaddeeda iyo astaanteeda, waxaa loo qaadanayaa inuu yahay mid sax ah, marka loo maro habraaca sharciga ah, waana in la aqbalaa iyada oo aan loo baahnayn caddayn dheeri ah.

Qodobka 4^{aad}:
Madaxbannaanida Hay'adda

Hay'addu waxay ay leedahay madaxbannaani shaqo iyo maamul, markay hawlaheeda fulinayso si waafaqsan qodobka 169 ee Dastuurka JFS.

Qodobka 5^{aad}:
Korjoogtaynta Wasiirka Maaliyadda

1. Hay'addu waxay hawlaheeda u gudanaysaa iyadoo hoos imanaysa korjoogteynta Wasiirka Maaliyadda.

2. Wasiirku wuxuu mas'uul ka yahay dejinta siyaasadda guud ee dakhliga Dalka, wuxuuna hubinayaa in Hay'addu si wax ku ool ah u gudaneyso, shaqadeeda si waafaqsan shuruucda uruurinta dakhliga ee dhaqan-gal ah.

3. Hay'addu waxay u soo gudbinaysaa Wasiirka warbixin sannadle ah ka dib marka uu dhammaado sannad-maaliyadeed kasta, sidoo kalena waxay u soo gudbinaysaa warbixinno rubucle ah ka dib dhammaadka rubuc kasta.

4. Wasiirka Maaliyadda ayaa go'aaminaaya boqolleyda ama saamiga dakhliga ee Hay'addu u goosan karto hawlaha dardargelinta dakhli uruurinta, iyadoo ay shardi tahay in boqolleydaas ama saamigaas lagu ansixiyo Sharciga Qoondada Miisaaniyadda, loona isticmaalo si waafaqsan tilmaamaha maaraynta maaliyadda guud ee Dalka.

5. Wasiirka Maaliyadda ayaa ansixinaaya tacriifooyinka iyo xeer-nidaamiyeyaasha, lagu dhaqan gelinayo sharciyada dakhliga.

6. Wasiirku wuxuu soo jeedin karaa magacaabista iyo xil ka qaadista Guddoomiyaha Guddiga iyo xubnaha lagu magacaabay Qodobka 7(1)(a) iyo (e), iyadoo la raacayo sababaha iyo habraacyada ku qeexan Qodobka 11aad ee Sharcigan.

7. Wasiirka ayaa leh awoodda guud ee siyaasadda iyo ansixinta canshuur-dhaafyada lasoo codsado, iyadoo la raacayo shuruucda dhaqan-galka ah, ujeeddooyinka siyaasadda maaliyadeed iyo habraacyada loo dejiyey si waafaqsan Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee dhaqan-galka ah.

Qodobka 6aad:
Shaqada Hay'adda

1. Shaqooyinka Hay'adda waxaa ka mid ah:
   (a) Maamulka iyo dhaqangelinta shuruucda dakhliga;
   (b) Qiimaynta, hubinta, ururinta iyo xisaabinta dakhliga si waafaqsan Shuruucda Dakhliga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
   (c) Ka shaqeynta codsiyada cashuur-dhaafka, xaqiijinta shuruudaha u-qalmitaanka cashuur-dhaafka iyo dukumentiyada taageeraya codsiga, iyo hirgelinta cashuur-dhaafyada uu ansixiyay Wasiirka;
   (d) Hubinta u hoggaansanaanta shuruucda dakhliga, oo ay ku jirto baarista canshuur-la-baxsiga, iyadoo baari karta xitaa dhaqaaq aan canshuur-gal aheyn balse xiriir la leh arrimo canshuureed;
   (e) Ka-latalinta Wasiirka arrimaha ku saabsan siyaasadda dakhliga, xoojinta dakhliga, canshuur-dhaafka iyo wax-ka-beddelka shuruucda, iyo xeer-nidaamiyeyaasha dakhliga;
   (f) Ururinta, falanqaynta iyo soo bandhigga warbixinta xogta dakhliga;

(g) La shaqeynta hay'adaha Dawladda oo ay ku jiraan hay'adaha dakhli-uruurinta Dawlad Goboleedyada iyo Dawladaha Hoose, si loo xaqiijiyo isku-xirnaanta nidaamka dakhli-uruurinta Dalka si waafaqsan Dastuurka;

(h) Wacyigelinta shacabka ee ku saabsan waajibaadka canshuur-bixinta, sida ku xusan Dastuurka;

(i) Horumarinta cilmi-baarista iyo xogta ku saabsan canshuuraha iyo maamulka dakhliga;

(j) Xoojinta mideynta dakhliga Qaranka, sida ku xusan Dastuurka;

(k) Horumarinta iyo casriyaynta hannaanka dakhli-uruurinta; iyo

(l) Fulinta hawlaha kale ee Hay'adda loogu igmado Sharcigan ama sharci kale ee dhaqangal ah ama lagama maarmaanka u ah, la xiriira ama wax u taraya gudashada hawlaheeda iyo waajibaadkeeda.

2. Hay'addu waxay awood u yeelaneysaa inay aas-aasto machad tababar oo loogu talagalay tababarka, tayeynta iyo horumarinta xirfadaha shaqaalaheeda iyo daneeyeyaasha kale ee ay khusayso, isla markaana lagu xoojiyo wacyigelinta canshuur-bixiyeyaasha, u hoggaansanaanta waajibaadka canshuuraha, iyo fahamka shuruucda dakhliga.

QAYBTA 3AAD: GUDDIGA SARE

Qodobka 7aad: Dhismaha iyo Xubnaha Guddiga Sare

1. Hay'addu waxay yeelan doontaa Guddi Sare, kaas oo ka kooban:
   (a) Guddoomiyaha Guddiga oo noqon doona qof madax-bannaan oo uu soo jeediyo Wasiirka Maaliyadda, laguna xusho karti, sumcad-wanaag, aqoon iyo khibrad xirfadeed oo la xiriirta maaliyadda, sharciga, dhaqaalaha ama maamulka iyo maaraynta;
   (b) Sarkaalka Idman ee Wasaaradda Maaliyadda;
   (c) Sarkaalka Idman ee Wasaaradda u xilsaaran arrimaha sharciga;
   (d) Guddoomiyaha Guddiga Qoondeynta iyo Wadaagga Dakhliga;
   (e) Labo (2) xubnood oo dheeraad ah oo uu soo jeediyo Wasiirka Maaliyadda, kuwaas oo noqonaya shakhsiyaad madax-bannaan oo lagu xusho karti, sumcad-wanaag iyo aqoon, isla markaana leh khibrad xirfadeed oo la xiriirta maaliyadda, dhaqaalaha, xisaabaadka ama maamulka iyo maareynta; iyo
   (f) Agaasimaha Guud ee Hay'adda Dakhliga Qaranka.

2. Agaasimaha Guud ee Hay'adda ayaa noqonaaya Xoghayaha Guddiga, isla markaana waxa uu mas'uul ka noqonayaa diyaarinta qoraallada rasmiga ah ee kulammada Guddiga iyo ilaalinta, kaydinta iyo daryeelka dhammaan diiwaannada iyo dukumentiyada Guddiga.

3. Soojeedinta Guddoomiyaha lagu xusay faqradda 1(a) iyo xubnaha lagu xusay faqradda 1(e) ee uu soo saaro Wasiirka Maaliyaddu waxay dhaqan-galaysaa kaddib marka uu Golaha Wasiirradu ansixiyo. Guddoomiyaha iyo xubnaha kale ee madaxa-bannaan waxay xilka hayn doonaan muddo shan (5) sano ah, waxaana dib loo magacaabi karaa hal muddo xileed kale oo keliya.

Qodobka 8aad:
Shaqada Guddiga

1. Shaqada Guddigu waa:
   (a) Dejinta iyo dib-u-eegista istiraatiijiyadda guud ee Hay'adda;
   (b) Kormeerka waxqabadka Agaasimaha Guud iyo guud ahaan Hay'adda;
   (c) Ansixinta qorshayaasha iyo soo jeedinta miisaaniyadda Hay'adda;
   (d) Dejinta shuruudaha shaqada iyo xeer-hoosaadyada anshaxa ee Hay'adda; iyo
   (e) Lasocdka waxqabadka Hay'adda ee ku aaddan yoolalka dakhli-uruurinta ee la ansixiyay;
2. Marka uu Guddigu gudanayo waajibaadkiisa, wuxuu Hay'adda siinayaa jihayn istiraatiiji ah, iyo kormeer guud, iyagoon faragelinayn maamulka maalinlaha ah ama hawlaha joogtada ah ee Hay'adda.

Qodobka 9aad:
Shirarka Guddiga

1. Guddigu waa inuu yeeshaa ugu yaraan hal kulan saddexdii (3) biloodba mar.
2. Gudoomiyuha ayaa guddoominaya shirarka Guddiga. Haddii Guddoomiyuhu maqan yahay xubnaha jooga ayaa magacaabaya shir-guddoonka.

3. Kooramka kulammada Guddigu wuxuu noqonayaa afar (4) xubnood, kuwaas oo midkood uu yahay Guddoomiyaha ama xubinta guddoominaysa kulanka.

4. Go'aannada Guddiga waxaa lagu gaarayaa cod aqlabiyad fudud ah ee xubnaha Guddiga ee goob-joogga ah. Haddii codadku is le'ekaadaan, Guddoomiyaha kulanka ayaa yeelanayaa cod dheeraad ah oo lagu kala baxo.

5. Qof kasta oo aqoontiisa takhasus ama khibraddiisa ama ka-qaybgalkiisa loo arko mid muhiim u ah gorfaynta iyo doodaha Guddiga, waxa marka ay lagama maarmaan noqoto lagu martiqaadi karaa inuu ka soo qayb galo kulammada Guddiga. Casuumadaha lagu martiqaadayo ka-qaybgalayaasha kulammada Guddiga waxaa soo saaraya Agaasimaha Guud, isaga oo la tashanaya Guddoomiyaha Guddiga. dadka la casuumay ma lahan wax cod ah, goob-joogna ma noqon doonaan xilliga codaynta.

6. Iyadoo la raacayo qodobbada Sharcigan, Guddigu wuxuu dejisan karaa habraacyada kulamadiisa oo ay ka mid yihiin jadwaleynta qabashada kulamada, dejinta ajandaha, habraacyada codaynta ee waafaqsan xayndaabka uu Sharcigani qeexayo, iyo sidoo kale habka diyaarinta, keydinta iyo ilaalinta diiwaannada iyo qoraallada rasmiga ah ee kulamadiisa iyo dhammaan hawlaha uu fuliyo.

Qodobka 10aad:
Guddi-hoosaadyada Guddiga

1. Guddigu wuxuu, haddii uu u arko inay lagama maarmaan u tahay fulinta hufan ee waajibaadkiisa, ka dhex dhisi karaa xubnihiisa guddi-hoosaadyo kala duwan, si loo xaqiijiyo hawl-gudasho wax ku ool ah.

2. Xubnaha guddi-hoosaadyada waxaa soo magacaabaya Guddoomiyaha Guddiga, isagoo ka dhex xulanaya xubnaha Guddiga, waxayna si toos ah ugu warbixin doonaan Guddiga.

Qodobka 11aad:
Luminta Xubinnimada Guddiga

1. Xilka xubin madax-bannaan oo ka tirsan Guddiga ee lagu magacaabay si waafaqsan Sharcigan, wuxuu bannaanaanayaa marka ay dhacdo mid ka mid ah arrimahan soo socda:
   (a) Geerida xubinta;
   (b) Marka xubinta lagu helo dembi ciqaabeed, laguna xukumo xukun kama dambays ah oo ka soo baxa Maxkamadda awoodda u leh;
   (c) Marka Guddoomiyaha ama xubin ay si rasmi ah isaga casisho xilkeeda, si waafaqsan shuruudaha iyo habraacyada ku xusan heshiiska ama qodobbada magacaabistiisa;
   (d) Marka u dhammaado muddada xileedka xubinta;
   (e) Marka maxkamad awood u leh ay ku dhawaaqdo in xubintu aysan sharci ahaan awood u lahayn gudashada waajibaadkeeda, ama ay la kulanto karti-

darro maskaxeed oo ka hor istaagaysa fahamka iyo maareynta arrimaheeda; iyo

2. Wasiirku wuxuu soo jeedin kara xilka ka qaadista xubin kasta oo madax-bannaan oo ka mid ah Guddiga ee lagu magacaabay si waafaqsan Sharcigan, oo uu ku jiro Guddoomiyaha, iyadoo lagu saleynayo mid ka mid ah sababaha soo socda:
   (a) Haddii xubintu ku guuldareysato sii buuxinta shuruudihii lagu magacaabay;
   (b) Haddii xubintu ku kacdo xadgudub weyn oo ka dhan ah heerarka iyo xeerarka anshaxeed ee lagu dhaqo Guddiga;
   (c) Haddii xubinta ay ku dhacdo awood-darro maskaxeed ama naafonimo jireed oo ka hor istaagi karta gudashada waajibaadkeeda shaqo, taas oo lagu caddeeyo warbixin rasmi ah oo uu bixiyo dhakhtar caafimaad;
   (d) Haddii xubintu ku kacdo dayacaad culus oo joogto ah taaso carqaladeysa gudashada waajibaadka shaqo;
   (e) Haddii xubintu ka maqnaato saddex (3) kulan oo xiriir ah, iyadoon jirin sabab macquul ah oo la aqbali karo; iyo
   (f) Haddii xubintu cudurdaar la'aan ku guuldarreysato inay daaha ka qaaddo dano gaar ah.

3. Marka Wasiirku helo sababo maangal ah oo xilka looga qaadi karo xubin madax-bannaan oo ka tirsan Guddiga si waafaqsan faqradda 2aad, Wasiirku waa inuu billaabo habraaca soo jeedinta xil-ka-qaadista, waxaana loo marayaa xil-ka-qaadistiisa hab la mid ah habkii lagu soo magacaabay, isagoo qoraal ku ogeysiinaya xubinta sababaha xil-ka-qaadista lagu saleeyey, isla markaana siinaya fursad macquul ah oo ay kaga jawaabto kuna soo bandhigto difaaceeda ka hor inta aan la gaarin go'aan kama dambays ah.

4. Xubnaha ku fadhiya Guddiga sababo la xiriira jagooyinka rasmiga ah oo ay hayaan dartood (ex-officio) ah ee lagu xusay Qodobka 7(1)(b), (c) iyo (d), waxay luminayaan xubinnimada Guddiga marka ay ka tagaan ama laga qaado xilka rasmiga ah ee ay ku heleen xubinnimada Guddiga, kaas oo sabab u ahaa ku soo biiristooda Guddiga.

5. Agaasimaha Guud waxa uu ka baxayaa xubinnimada Guddiga marka uu joojiyo haynta xilka Agaasimaha Guud, ha ahaato mid ku timaada iscasilaad, xil-ka-qaadis, dhammaadka mudda xilleedka, ama siyaabo kale oo waafaqsan Sharcigan.

6. Ansaxnimada hab-socodka kullamada Guddiga ma saameyn doonto xil-bannaynta xubin, khalad ku yimaada magacaabista xubin ama ka-qaybgalka qof aan si sharci ah xaq ugu lahayn ka qaybgalka kullamad Guddiga, hase yeeshe waxaa shardi ah in shuruudaha kooramka ee lagu qeexay Sharcigan si buuxda loo buuxiyo, isla markaana go'aannada lagu gaaro si waafaqsan shuruudaha codbixinta ee waajibka ah.

QAYBTA 4^AAD^:
MAAMULKA HAY'ADDA IYO SHAQAALAHA HAY'ADDA

Qodobka 12^aad^:
Agaasimaha Guud

1. Hay'addu waxay yeelan doontaa Agaasime Guud, kaas oo noqon doona Madaxa Fulinta iyo Sarkaalka Idman ee Hay'adda.

2. Agaasimaha Guud waxaa magacaabi doona Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, iyadoo lagu saleynayo soo-jeedinta Golaha Wasiirrada, ka dib marka uu Wasiirka Maaliyaddu soo gudbiyo musharraxa u qalma magacaabista.

3. Qofka loo magacaabaayo xilka Agaasimaha Guud waa inuu buuxiyaa shuruudaha guud ee looga baahan yahay saraakiisha sare ee rayidka ah ee ku xusan xeerarka dhaqan-galka ah ee shaqaalaha rayidka ah, kuwaas oo ay ka mid yihiin kuwa soo socda balse aan ku ekayn:
   (a) In uu yahay muwaadin Soomaaliyeed;
   (b) In uu haysto shahaado jaamacadeed oo la aqoonsan yahay oo ku takhasustay maaliyadda, dhaqaalaha, xisaabaadka, maamulka ama sharciga;
   (c) In uu leeyahay ugu yaraan toban (10) sano oo waayo-aragnimo iyo khibrad xirfadeed oo la xiriirta maamulka, maaliyadda, canshuuraha ama maaraynta hay'adaha dowladda; iyo
   (d) In lagu yaqaan daacadnimo iyo sumcad-wanaag.
   (e) Agaasimaha Guud wuxuu mas'uul ka yahay arrimaha ay ka mid yihiin:
   (f) Maareynta maalinlaha ah ee Hay'adda;
   (g) Fulinta go'aamada Guddiga;
   (h) Maamulka dhaqaalaha, hantida iyo shaqaalaha Hay'adda;
   (i) Diyaarinta iyo u soo gudbinta Guddiga qaab-dhismeedka maamulka, nidaamka shaqaaleysiinta iyo habraacyada hawlgalka ee Hay'adda, si Guddigu u ansixiyo;

(j) Diyaarinta iyo u soo gudbinta Guddiga qorshayaasha istiraatiijiga ah iyo miisaaniyadda Hay'adda, si ay u ansixiyaan;
(k) U gudbinta Guddiga warbixinno xilliyeed ka tarjumaya hawlaha, natiijooyinka, iyo guud ahaan waxqabadka Hay'adda;
(l) U gudbinta Wasiirka, marka uu soo dalbado, warbixinno ku saabsan waxqabadka Hay'adda oo ay ka mid yihiin arrimaha hawlgallada, maaliyadda iyo istiraatiijiyadda;
(m) Soo-jeedinta tacriifooyinka iyo xeer-nidaamiyeyaasha lagu dhaqan gelinayo sharciyada dakhliga;
(n) Usoo gudbinta Wasiirka Maaliyadda warbixinnada rubuclaha ah iyo kuwa sanadlaha ah ee ku xusan Qodobka 5(3) ee Sharcigan; iyo
(o) Xaqiijinta in Hay'adda laga dhex dhiso loona hirgeliyo si hufan nidaamyo ku habboon oo loogu talagalay koontoroolka gudaha, maaraynta khataraha iyo hubinta u hoggaansanaanta shuruucda.

4. Agaasimaha Guud waxa uu xilka wayn karaa haddii la helo mid ka mid ah xaaladaha soo socda:
   (a) Dhammaadka mudda xileedka;
   (b) Marka Agaasimaha Guud is-casilaad qoraal ah u gudbiyo Madaxweynaha, Golaha Wasiirada, Wasiirka Maaliyadda, iyo Guddiga; iyo
   (c) Geerida Agaasimaha Guud.
5. Agaasimaha Guud waxaa xilka looga qaadi karaa mid ka mid ah sababaha soo socda:
   (a) Musuqmaasuq;
   (b) Anshax-xumo;
   (c) Awood-darro joogto ah oo uu ku gudan waayo waajibaadkiisa shaqo, ha noqoto mid jireed ama maskaxeed, taas oo lagu caddeeyo warbixin caafimaad oo ka timid dhakhtar caafimaad ama lagu xaqiijiyo qiimeyn rasmi ah ee waxqabad shaqo; iyo
   (d) Ku xadgudubka waajibaadka ilaalinta ammaanada.
6. Marka xilka laga qaadaayo Agaasima Guud si waafaqsan faqradda 6[aad] ee Qodobkan, Wasiirka Maaliyaddu wuxuu billaabayaa habraaca isagoo Golaha Wasiirrada u gudbinaya soo-jeedin qoraal ah oo si faahfaahsan u caddeyneysa sababaha iyo caddaymaha taageeraya xil ka qaadista. Marka ay helaan, Golaha Wasiirradu waxay dib u eegayaan soo-jeedinta xil ka qaadista oo haddii ay ku qancaan in ay jiraan sababo ku filan, waxay u gudbinayaan Madaxweynaha talo-soo-jeedin rasmi ah oo ku saabsan go'aanka xil ka qaadista. Madaxweynaha, marka uu helo talo-soo-jeedintaas, wuxuu qaadanayaa go'aanka kama dambaysta ah ee xil-ka-qaadista isagoo ku soo saaraya qoraal rasmi ah. Kahor

inta aan la gaarin go'aanka kama dambaysta ah, Agaasimaha Guud waxaa la siinaya fursad macquul ah oo loogu oggolaanayo in la dhegeysto oo uu uga jawaabo eedeymaha.

7. Agaasimaha Guud waxa uu xilkiisa haynayaa muddo shan (5) sano ah oo ka billaabmaysa taariikhda la magacaabay, taas oo hal mar oo keliya dib loogu cusboonaysiin karo iyadoo la raacayo habraaca loogu talagalay magacaabista. Marka uu dhammaado muddo-xileedku, isla markaana aan weli si rasmi ah loo magacaabin oo xilka ula wareegin Agaasime Guud oo beddelaya, Agaasimaha Guud waxa uu sii wadanayaa gudashada waajibaadkiisa isagoo si ku-meelgaar ah u haynaaya xilka, ilaa laga magacaabo oo si rasmi ah xilka ula wareego Agaasime Guud oo cusub.

Qodobka 13^{aad}:
Maareynta Shaqaalaha iyo Ilaalinta Hufnaantooda

1. Qorista shaqaalaha Hay'adda waxay ku salaysnaan doontaa karti, daacadnimo, tartan furan iyo fursado loo siman yahay, si waafaqsan Dastuurka iyo Sharciga Shaqaalaha Rayidka Dawladda, waxaana loo fulinayaa si daah-furan, hufan oo aan takoor lahayn.

2. Siyaasadda maareynta shaqaalaha Hay'adda waxaa loo dhaqan gelin doonaa si waafaqsan Sharciga Shaqaalaha Rayidka, waxaana la dejin doonaa xeer-hoosaadyo gudaha ah oo la xiriira shuruudaha shaqada iyo anshaxa shaqaalaha, kuwaas oo uu ansixiyo Guddiga.

3. Shaqaaluhu waxay si shakhsi ah u qaadi doonaan mas'uuliyadda fal kasta oo sharci-darro ah ama khalad ah oo ay si ula kac ah u galaan markay gudanayaan waajibaadkooda shaqo, waxaana lagu dabaqi doonaa tallaabooyin anshaxeed iyo kuwo sharci oo ku habboon oo waafaqsan Sharciga Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda iyo xeer-nidaamiyeyaasha gudaha ee Hay'adda, iyadoo aan waxba loo dhimayn mas'uuliyad kasta oo ciqaabeed oo ka dhalan karta falalkaas sida ay dhigayan shuruucda dalka ee dhaqan-galka ah.

4. Shaqaalaha, saraakiisha iyo maamulka Hay'adda looma ogola in ay ka qaybqaataan hawlaha xisbiyada siyaasadda oo ay ka mid yihiin ololeynta, uruurinta deeqaha, ama qabashada xil xisbiyeed, inta ay ku jiraan shaqada ay u hayaan Hay'adda.

5. Shaqaalaha, saraakiisha iyo maamulka Hay'adda waa in ay ilaaliyaan sirta dhammaan xogaha rasmiga ah ee ay ku helaan gudashada waajibaadkooda shaqo, mana bannaana in ay shaaciyaan ama faafiyaan xogtaas, marka laga reebo xaaladaha uu sharcigu oggolaaday ama marka ay lagama maarmaan u tahay gudashada saxda ah ee howlahooda rasmiga ah.
6. Shaqaalaha, saraakiisha iyo maamulka Hay'adda waa inay ka fogaadaan xaalad kasta oo keeni karta dano is-diidan oo dhab ah, suuragal ah ama loo arki karo inay jiraan inta ay gudanayaan waajibaadkooda shaqo, waana inay si waafaqsan shuruucda, xeer-nidaamiyeyaasha iyo siyaasadaha gudaha ee Hay'adda u shaaciyaan dano kasta oo is-diidan oo noocaas ah.
7. Shaqaalaha, saraakiisha iyo maamulka Hay'adda waa inay u hoggaansamaan xeerka anshaxa, xeerarka hab-dhaqanka iyo heerarka xirfadeed ee lagu qeexay Sharcigan, Sharciga Shaqaalaha Rayidka ah iyo siyaasadaha ama xeer-nidaamiyeyaasha gudaha ee ay Hay'addu soo saarto.

Qodobka 14aad:
Ilaalinta Wargeliyaha

1. Shaqaale kasta oo ka tirsan Hay'adda oo si niyad-sami iyo daacadnimo ku jirto u soo sheega ama uga warbixiya wax-isdaba-marin, khaladaad la xiriira maamulka iyo maareynta Hay'adda, musuqmaasuq ama falal sharci-darro ah, waxa uu mudanayaa ilaalin buuxda, lamana marsiin karo nooc kasta oo tallaabo aargoosi ah oo ay ku jiraan tallaabooyin edbin ama anshax-marin ah, shaqo-ka-eryid, shaqo-ka-joojin, cagajugleyn, dhibaateyn, takoorid ama wax kasta oo dhibaato ku ah shaqadiisa oo ka dhalan karta warbixintaas. Intaa waxaa dheer, aqoonsiga qofka xogta soo tebiyay waa in si qarsoodi ah loo ilaaliyaa, ilaa inta uu sharcigu oggol yahay.

2. Qof kasta oo soo sheega falalka ku xusan faqradda 1aad ee Qodobkaan, isla markaana la kulma waxyeello la xiriirta shaqadiisa ama tallaabo aargoosi ah oo ka dhalatay gudbinta warbixintaas, wuxuu xaq u yeelanayaa inuu ka raadsado maxkamad awood u leh ama hay'ad kale oo sharci ahaan loo aasaasay xalalka ku habboon oo ay ku jiraan magdhow ama dib-ugu-soo-celin shaqo.

Qodobka 15aad:
Magacaabista Shaqaalaha iyo Saraakiisha

1. Agaasimaha Guud wuxuu u magacaabi karaa Agaasimeyaasha waaxyaha kala duwan ee Hay'adda, iyadoo laga soo xulaayo musharrixiinta ama saraakiisha buuxiya shuruudaha aqooneed iyo waayo-aragnimo ee la dejiyey si waafaqsan

Sharciga Shaqaalaha Rayidka Dawladda.

2. Agaasimaha Guud wuxuu magacaabi karaa dhammaan shaqaalaha kale ee lagama maarmaanka u ah hawlaha Hay'adda, iyadoo laga soo xulaayo musharrixiinta buuxiya shuruudaha aqooneed iyo waayo-aragnimo ee la dejiyey, si waafaqsan Sharciga Shaqaalaha Rayidka Dawladda.

QAYBTA 5AAD:
MAALIYADDA IYO XISAABTA

Qodobka 16aad:
Maamulka Dakhliga iyo Isticmaalka Khasnadda Midaysan

1. Dhammaan dakhliga ay Hay'addu uruuriso waxaa lagu shubayaa Khasnadda Midaysan ee Dawladda (TSA), mana bannaana in lagu hayo meel kale ama laga bixiyo wax kharash ah oo ka baxsan qoondooyinka lagu ansixiyay Sharciga Qoondada Miisaaniyadda.

2. Dhammaan dakhliga soo xarooda waa in, muddada loo cayimay gudahood, lagu wareejiyaa Khasnadda Midaysan ee Dawladda (TSA), iyadoo si buuxda loogu hoggaansamayo dhammaan habraacyada iyo nidaamyada uu soo saaro Wasiirka Maaliyadda.

3. Hay'addu ma furi karto, ma isticmaali karto, mana maamuli karto wax xisaab bangi ah oo loogu talagalay qabashada, haynta ama maaraynta dakhliga, ilaa ay ka hesho oggolaansho qoraal ah Wasiirka Maaliyadda si waafaqsan shuruucda maareynta maaliyadda.

4. Kharashka ku baxa shaqooyinka iyo hawlgallada Hay'adda waxaa laga bixin doonaa qoondaynta miisaaniyadeed ee lagu ansixiyo Sharciga Qoondada Miisaaniyadda.
5. Iyadoo aan waxba loo dhimayn faqradda 1aad, Wasiirka Maaliyadda ayaa go'aamin kara boqolleyda ama saamiga dakhliga ee Hay'addu u goosan karto hawlaha dardargelinta dakhli uruurinta, iyadoo ay shardi tahay in boqolleydaas ama saamigaas lagu ansixiyo Sharciga Qoondada Miisaaniyadda, loona isticmaalo si waafaqsan tilmaamaha maaraynta maaliyadda guud ee Dalka.

Qodobka 17aad: Dhaqaalaha Hay'adda

1. Ilaha dhaqaale ee Hay'addu waxay ka koobnaanayaan:
   (a) Lacagaha uu Baarlamaanku u qoondeeyo ujeedooyinka iyo gudashada hawlaha Hay'adda; iyo
   (b) Deeqaha ama tabarucaadka ay Hay'addu si sharciga waafaqsan ku hesho, isla markaana uu oggolaado Wasiirka.

2. Dhaqaalaha Hay'adda waxaa lagu bixinayaa:
   (a) Gunnooyinka loo ansixiyey xubnaha Guddiga Sare;
   (b) Mushaharaadka iyo gunnooyinka saraakiisha iyo shaqaalaha; iyo
   (c) Kharashaadka shaqada ee Hay'adda oo ay ku jiraan kuwa horumarineed.

Qodobka 18aad: Diyaarinta Soojeedinta Miisaaniyadda Hay'adda

1. Agaasimaha Guud wuxuu diyaarinayaa soojeedinta miisaaniyadda Hay'adda sanad kasta, wuxuuna u gudbinayaa Guddiga iyo Wasiirka Maaliyadda si waafaqsan Dastuurka.

2. Agaasimaha Guud wuxuu diyaarin karaa qiyaaso dheeraad ah (supplementary estimates) haddii loo baahdo kadib markii uu ansixiyo Wasiirka si loogu daro miisaaniyadda.

Qodobka 19aad: Xisaabaadka iyo Hantidhawrka

1. Hay'addu waa inay si joogto ah, sax ah oo nidaamsan u diyaarisaa, una kaydisaa xisaabaadka iyo diiwaannada xisaabeedka, iyadoo si buuxda ula jaanqaadaysa heerarka iyo hannaanka xisaabinta ee loo dejiyey Hay'adaha Dowladda Federaalka Soomaaliya, si waafaqsan Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee dhaqan-galka ah.

2. Hay'adda waxay u diyaarinaysaa, isla markaana ay u gudbinaysaa bayaannadeeda maaliyadeed ee sanadlaha ah habka loo cayimay, iyadoo si buuxda u raacaysa shuruudaha lagu dejiyay hannaanka sharciyeed ee maareynta maaliyadda guud. Bayaannada maaliyadeed waxaa baari doona Hanti-dhowraha Guud, iyadoo loo fulinayo si waafaqsan habraaca hanti-dhawrka ee hay'addaha Dowladda Federaalka Soomaaliya. Bayaannada maaliyadeed ee la

hanti-dhawray iyo warbixinta hanti-dhawrka ee la xiriirta waxaa loo gudbin doonaa Baarlamaanka Federaalka, waxaana sidoo kale loo faafin doonaa si waafaqsan shuruucda iyo habraacyada nidaamiya hanti-dhawrka hay'addaha Dawladda Federaalka Soomaaliya.

3. Agaasimaha Guud waa inuu hubiyaa in xisaabaadka la hantidhawray loo daabaco si waafaqsan sharciyada iyo habraacyada nidaamiya faafinta guud ee warbixinnada xisaab-xirka iyo hanti-dhawrka.

Qodobka 20aad:
Warbixinno Xilliyeedka

1. Agaasimaha Guud waa inuu diyaariyaa warbixinno xilliyeed ku saabsan hawlaha iyo waxqabadka Hay'adda, oo ay ku jiraan warbixinno rubucle ah iyo kuwo sannadle ah.

2. Warbixinnada rubucle ah waxaa la soo gudbinayaa dhammaadka rubuc kasta, halka warbixinta sannadlaha ah la soo gudbinayo ka dib dhammaadka sannad-maaliyadeed kasta, waxaana loo gudbinayaa Guddiga iyo Wasiirka.

QAYBTA 6AAD:
XOOJINTA DAKHLIGA IYO WADASHAQEYNTA

Qodobka 21aad:
Uruurinta Cashuuraha Dowladda Federaalka

1. Hay'addu waxay uruurineysaa cashuuraha u gaarka ah Dowladda Federaalka ee lagu sheegay Jadwalka 2(A) ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya kuwaasoo ah:
   (a) Canshuuraha furdooyinka, xuduudaha iyo ganacsiga caalamiga ah;
   (b) Canshuuraha dakhliga shirkadaha waaweyn ee heer qaran iyo kuwa caalamiga ah;
   (c) Canshuuraha tubaakada, buuriga iyo alaabooyinka kale ee uu Baarlamaanka Federaalka ku soo rogo cashuuraha gaarka ah;
   (d) Canshuurta Moorka heer federal (Stamp duty in federal level);
   (e) Canshuurta waddo-marista ee qeybta waddooyinka u kala goosha Dawlad Goboleedyada;
   (f) Canshuurta Faa'iidada raasumaalka (Capital Gains) ee laga helo iibka ama maalgashiga;

(g) Dakhliga ka soo xarooda kheyraadka dabiiciga ah;
(h) Khidmadaha kale ee gaar ah oo uu jideeyey xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka;

2. Deeqaha caalamiga ah iyo amaahda dibedda ama gudaha ee magac Dawladda Federaalka lagu helo;

Qodobka 22aad:
Uruurinta Cashuuraha Wadaagga Ah

1. Hay'addu waxay uruurineysaa cashuuraha wadaagga ah (concurrent taxes) ee lagu sheegay Jadwalka 2(B) ee Dastuurka.
2. Cashuuraha wadaagga ah waxaa ka mid ah:
   (a) Canshuurta gadista;
   (b) Canshuuraha macaashka shakhsiga;
   (c) Canshuurta Macaashka guryaha;
   (d) Canshuurta Macaashka Shirkadaha;
   (e) Khidmadaha Mihnadaha/Karaanka;
   (f) Canshuurta diiwaangelinta qaansheegadka iyo heshiisyada.

3. Marka ay uruurinayso cashuuraha wadaagga ah, Hay'addu waxay la shaqayn doontaa hay'adaha maaliyadeed ee Dawlad Goboleedyada iyo Dawladaha Hoose si loo xaqiijiyo in aan canshuur bixinno is-dhafan ama labanlaab ah uusan uga imanayn heerarka dawladda.

4. Hay'addu waxay la gali kartaa heshiisyo iskaashi hay'adaha maaliyadeed ee heerarka hoose si loo wanaajiyo uruurinta cashuuraha wadaagga ah.

Qodobka 23aad:
Sharciyada Dakhliga ee ay Ku Shaqaynayso Hay'adda

1. Hay'addu waxay dabaqeysaa ama fulinaysaa dhammaan sharci kasta oo la xiriira dakhliga oo heer federaal ah ee uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya:
   (a) Sharciga Canshuurta Dakhliga, Sharci Lr. 37 -- 2025;
   (b) Sharciga Canshuurta Gadista, Sharci Lr. 2 -- 1984;
   (c) Sharciga Furdooyinka, Sharci Lr. 21 ee soo baxay February 2020;
   (d) Sharciga Maamulka Dakhliga, Sharci Lr. 13 ee soo baxay October 2019;
   (e) Xeerka Canshuurta Excise-ka, Sharci Lr. 3 ee soo baxay 23 May 1985;
   (f) Sharciga Canshuurta Wadamarista, Sharci Lr. 4 ee soo baxay Diseembar 1965;
   (g) Sharciga Canshuurta Moorka (Stamp Duty), Sharci Lr. 6 Diseembar 1966;
   (h) Sharciga Lagu Hago Nidaam Maaliyadeed Kheyraadka Dhulka Hoostiisa, Sharci Lr. 10 ee soo baxay Maarso 2023;
   (i) Iyo sharci kasta oo kale oo lagu maamulayo canshuuraha oo dhaqan-gal ah.

2. Khidmadaha lagu qeexay shuruucda iyo xeerar hay'adaha kala duwan ee Dawladda Federaalka si waafaqsan Qodobka 5(5) ee Sharcigan.

Qodobka 24aad:
Abaalmarinta

1. Agaasimaha Guud, isagoo ku saleynaya talo-soo-jeedinta madaxda waaxyaha, wuxuu siin karaa abaal-marin qof kasta oo si niyad-sami leh usoo gudbiya xog sugan oo horseedaysa helidda canshuuro aan la bixin ama la qariyey, iyadoo shardi ah in xogtaasi aysan hore ugu jirin gacanta Hay'adda ama aysan ahayn mid si guud loo heli karo. Qodobkan ma khuseeyo shaqaalaha Hay'adda.

2. Abaalmarinta waxaa lagu go'aamin doonaa si waafaqsan Habraac uu ansixiyay Guddiga.

QAYBTA 8^AAD^:
QODOBBO KALA DUWAN

Qodobka 25^aad^:
Xeer-nidaamiyeyaasha

1. Xeer-nidaamiyeyaasha Hay'adda waxaa diyaarinaya Agaasimaha Guud, isagoo si dhow ula tashanaya Guddiga.

2. Xeer-nidaamiyeyaasha ay diyaarisay Hay'addu waxay dhaqan-gelayaan kaddib marka uu Wasiirku ansixiyo.

Qodobka 26^aad^:
Kala-guurka

1. Dhammaan hantida, xuquuqaha, waajibaadka iyo deymaha horay ugu xirnaa hawlaha maamulka dakhliga ee ay Wasaaradda Maaliyaddu fulin jirtay iyada oo adeegsanaysa Agaasinka Dakhliga, waxaa lagu wareejinayaa Hay'adda, iyadoo lagu xaddidayo inta ay hantida, xuquuqaha, waajibaadka iyo deymahaasi lagama maarmaanka u yihiin si Hay'addu u gudato waajibaadkeeda sharciyeed.

2. Dhammaan shaqaalaha hore uga tirsanaa Waaxda Dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda waxaa loo wareejinayaa Hay'adda, waxayna kusii shaqayn doonaan shuruudahii iyo xaaladihii shaqo ee ay hore ugu sugnaayen.

Qodobka 27^aad^:
Dhaqangalka Sharciga

Sharcigan wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, uuna saxiixo Madaxweynaha JFS, waxaana lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.